## Waxaanu doonaynaa inaad na siiso fikirkaaga ku saabsan caymiska OHP ee xubnaha ka yar 21 jir!

Barnaamijka Baaritaan Xilliyeedka, Qiimeynta iyo Daaweynta Xilliga Hore (EPSDT) wuxuu caymis caafimaad oo buuxa siiyaa xubnaha Qorshaha Caafimaadka ee Oregon (OHP) ee ka yar da'da 21 jir. Laga bilaabo 2023, waxyaabo badan baa lagu siin doonaa caymiska xubnaha ka yar 21 EPSDT dartii. Waxaad wixii dheeri ah ka heli kartaa www.Oregon.gov/EPSDT

Hay'adda Caafimaadka Oregon waxay cusbooneysiinaysaa shuruucda maamulka ee EPSDT. Tani waxay caawineysa in shuruudaha cusub ee caymiska ku saabsan noqdaan kuwo waadax ah. Shuruucdani waa xeerar ay tahay in Hay'adda Caafimaadka Oregon, ururada isku-duwan ee xannaaneynta (COOs) iyo adeeg bixiyayaasha OHP ay raacaan marka ay go'aaminayaan caymiska loogu talagalay xubnaha OHP ee ka yar 21 jir.

**Waxaanu jeclaan lahayn inaanu ra'yigaaga helno! Waxaanu rabnaa in shuruucdani ka turjumaan baahiyaha xubnaha OHP ee ka yar 21 jir iyo qoysaskooda, iyo adeeg-bixiyayaasha iyo CCO-yada u adeega.** Waxaanu raadineynaa xubno ka tirsan OHP, waalidiin/daryeel bixiyayaal, adeeg bixiyayaal, hagayaal/kaaliyayaal, shaqaalaha CCO iyo kuwo kale oo tan naga caawiya. Waxaad dooran kartaa inaad:

- Ka qayb-qaadato kulanka Guddida Ka-talabixinta Shuruucda (RAC) ee dhici doona qaybta dambe ee bisha Luulyo ama horraanta Agoosto 2023. RAC-yadu waxay ka kooban yihiin xubno bulshada ka socda oo fikrad iyo soo jeedino ka bixiya shuruucda.
- Qorsheyso waqti aad kula kulmeyso shaqaalaha EPSDT inta lagu jiro Xagaaga 2023. Adiga ama ururkaaga oo keliya ayaanu la kulmi karnaa. Ama waxaanu bulshadaada xilli idinku habboon u qaban karnaa kulan dhegeysi kooxeed.
- Ra'yiga soo dhex mari nidaamka faallada dadwaynaha inta lagu jiro Deyrta 2023. Waxaad iska diiwaangelin kartaa halkan ama barta https://public.govdelivery.com/accounts/ORDHS/signup/25027 si aad u hesho ogeysiin xilliga faallada dadwaynuhu furmeyso.

Ma xiiseynaysaa inaad ka qaybgasho RAC ama kulano kale ama ma qabtaa wax su'aalo ah? Iimayl ku dir EPSDT.Info@odhsoha.oregon.gov ama soo wac 503-891-9335 oo noo soo sheeg!

Qof kasta xaq buu u leeyahay inuu ogaado oo isticmaalo adeegyada iyo barnaamijyada OHA. OHA waxay bixiyaan kaalmo bilaash ah. Qaar ka mid ah tusaaleyaasha kaalmada bilaashka ah ee OHA bixiso waa:

- Luqadda dhegoolaha iyo turjubaanka luqadda lagu hadlo

- Qoraalo ku qoran luuqado kale
- Farta Indhoolaha
- Daabacaad Balaadhan
- Maqal iyo qaabab kale

Haddii aad u baahan tahay kaalmo ama aad qabto su'aalo, fadlan Liz Stuart kala xiriir lambarka 503-891-9335, 711 TTY, ama iimaylka EPSDT.Info@odhsoha.oregon.gov